

# Caawimada hore ee caruurta yar-yar iyo kuwa raad-qaadka ah (ESIT) barnaamijka nidaamka macluumaadka elektarooniga ah

Macluumaadkan soo socdaa waxay leh qoysaska nidaamyada adeegyada kaalmada lasiiyo caruurta si loogu sharaxo sida ESIT usoo ururiso una kaydiso macluumaadka qoyska/ilmaha ku jira nidaamka macluumaadka ESIT.

Macluumaad dheeraad ah booqo: [www.dcyf.wa.gov/services/child-dev-support-providers/esit](http://www.dcyf.wa.gov/services/child-dev-support-providers/esit)

## Maxay xogta qoyskeygu ugu kaydisan yihiin Nidaamka Xogta ee ESIT?

Si looga caawiyo Isuduwahaaga Kheyraadka Qoyska (FRC) iyo adeeg bixiyeyaasha in ay ku siiyaan adeegyo waqti ku habboon iyo iyadoo la raacayo xuquuqda waalidka/carruurta sida lagu qeexay Sharciga Waxbarashada Naafada Shakhsiyaadka (IDEA), Qaybta C. Nidaamka Xogta wuxuu si otomaatig ah u soo saaraa federaalka iyo gobolka warbixinnada lagama maarmaanka u ah helitaanka maalgalinta maxalliga, gobolka iyo federaalka ee adeegyada. Dhammaan xogta heerka carruurta waxaa loogu soo warbixiyaa si qarsoodi ah warbixinta gobolka iyo federaalka. Macluumaadka ayaa la uruuriyaa si loo go'aamiyo ku haboonaanshaha ilmahaaga ee adeegyada kaalmada caruurta iyo in la sameeyo Qorshaha Adeegga Qoyska ee Gaarka ah (IFSP).

Nidaamka Xogta wuxuu ka caawiyaa FRCs iyo bixiyeyaasha ESIT xaqiijinta adeegyada waxaa lagu bixiyaa si waafaqsan IDEA, Qaybta C.

## Macluumaadkaygu ma badqabaan?

Haa! Macluumaadkaaga waxa lagu kaydiyay meel ka dambaysa afar heer oo ilaalo ah. Sidoo kale waa la kala qaadaa marka ay ku dhex socoto inta u dhexeysa kombuyuutarkaaga FRC iyo Nidaamka Xogta.

## Xagee ayaa xogtayda lagu kaydinaayaa?

Macluumaadkaaga waxa lagu kayd in doonaa nidaamka xogta iyo fure sireed ay ilaaliyeen bixiyaasha FRC iyo ESIT.

Macluumaadkaaga waxa lagu kayd in doonaa kayd macluumaad nabdoon oo ay maamusho barnaamijka ESIT. Xogta lama gali karo iyadoo loo marayo intarnet ka oo macluumaadkana laguma kayd in intarnetka.

Qaar kamid ah waraaqaha faylasha oo waxa si nabdoon loogu kayd in doonaa FRC-gaaga.

## Yaa gali kara macluumaadka qoyskayga?

Kaliya FRC, bixiyaha ESIT iyo DCYF ESIT ayaa heli kara macluumaadka qoyskaaga oo faahfaahsan. FRC iyo bixiyaha ESIT waxay u ogolaan karaan xubnaha kale ee kooxda IFSP inay helaan macluumaadka kaliya kadib markaad bixiso ogolaanshahaaga.

Nidaamka Xogta ee 'ESIT Data System' waa inuu sii wadaa inuu buuxiyo shuruudaha Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Xeerka Sirta (FERPA). Tani waa xaqiiqada dhamaan diwaanada ha noqdaan qaar elektaroonik ah ama qaar warqado ku qoran.

Bixiyeyaasha ESIT iyo barnaamijka DCYF ESIT waxay heli doonaan warbixinno kooban oo ku saabsan carruurta iyo qoysaska qaata adeegyada kaalmada caruurta. Shaqaalaha Barnaamijka ESIT waxay lahaan doonaan xuquuqda aqrinta kaliya ee macluumaadka shakhsiga ee qoyskiisa.

Waalidiintu waxay ka codsan karaan warbixin FRC-da, oo muujinaya dhammaan dadka helay macluumaadka qoyskooda.

## Waa maxay macluumaadka la soo uririn doono?

Macluumaadka laga helay qoyskaaga waxa la galin doonaa nidaam macluumaad. FRC-gaadu waxay ku siin karaan liis buuxa iyo nuqulada macluumaadka la ururiyey laguna kaydiyay nidaamka elektarooniga ah.

Qoraalkaaga Qoyska oo ay ku jiraan welwelkaaga, mudnaantaada iyo ilahaaga ayaa sii wadaya ikhtiyaari oo ay heli karaan oo keliya FRC-gaada, adiga, bixiyahaaga ESIT iyo shaqaalaha DCYF ESIT.

## Sideen ku arki karaa macluumaadka ku jira nidaamka qoyskayga ku saabsan?

Furahaaga helitaanka macluumaadka waa Meesha Waalidka iyo FRC-gaaga.

## Haddii aanan rabin macluumaadka qoyskayga ee nidaamka, weli miyaan ka qayb geli karaa?

Haddii aad rabto inaad kaqeybqaadato adeegyada kaalmada caruurta, qaddarka ugu yar ee macluumaadkaaga ayaa loo baahan yahay in lagu soo ururiyo Nidaamka Xogta ee ESIT iyadoo qayb ka ah waajibbaadkayaga federaalka iyo gobolka.

*Hadii aad jeclaan lahayd nuqulka dokumentigan oo qaab ama luuqad kale ah, fadlan la xiriir DCYF Xiriirka Gobolka  
(1-800-723-4831 | 360-902-8060, [ConstRelations@dcyf.wa.gov](mailto:ConstRelations@dcyf.wa.gov)).*

DCYF PUBLICATION FS\_0012 SM (03-2021) Somali

